

Bulshooyin Caafimaad qaba



Ciladaha

Go'aannada la xariira isticmaalka dhulka ayaa u muuqda kuwo lagu salaynaayo hormarinta dhaqaalaha. Natijada ayaa noqotay magaalooyin iyo xaafado ka shaqaynaaya inay ka raraan bulshooyinka daganaa deegaanka si loogu sameeyo hormarin dheeraad ah. Madoowga, Dadka Dhaladka ah, dadka aan cadaanka ahayn iyo Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska (BIPOC-AI/AN) ayaa u baahan inay qayb ka ahaadaan go'aaminta qorshaynta isticmaalka dhulka iyo go'aanada deegaamaynta ee saamaynta ku leh bulshooyinkooda.

Helitaanka goobo caafimaad leh halkaasoo xubnaha bulshadu ay ka helayaan badqab iyo taageero ayaa ku haboon qof kasta oo ku nool Oregon. Healthier Together Oregon (HTO) waxay ku baaqaysaa in bulshadu sinaato ayna helaan fursado shaqo oo ay u siman yihiin, ayna helaan waxbarashada jaamcada iyo mushaaraad ku filan noloshada dadka oo dhan. Sanadihii hore ee aafada COVID-19 ayaa muujiyay xoog badan oo hal adayga bulshada. HTO ayaa doonaysa inay taageerto bulshooyinka si loo hormariyo loona xoojiyo hal adaygaan socda.

Xalalka

Istaraatiijiyadaha si kor loogu qaado bii'ada la dhisay, hal adkaysiga bulshada iyo kobaca dhaqaalaha ayna ku jiraan:

- Xoojinta kobaca dhaqaalaha, shaqada iyo kobaca ganacsiyada yaryar ee bulshooyinka aan helin adeegyo ku filan

- In bud-dhig looga dhigo bulshooyinka BIPOC-AI/AN gaarista go'aannada la xariira qorshaha adeegsiga dhulka iyo deegaameynta si loo abuuro xaafado badqab leh, la geli karo, qiimo jaban oo caafimaad leh

HTO ayaa doonaysa inay dhisto hal adayg bulsho oo qaabab badan ah:

- Xal u helida baahiyaha dhallinta ayadoo la adeegsanaayo barnaamijyada la socoshada bulshada, ee dadku isdhaafsanayaan iy kuwa isdhexgalka
- Kor u qaadista munaasabada farshaxanka iyo dhaqanka ee bulshooyinka diirada la saaraayo
- Kordhinta xariirada bulshada ee dadka waayeelka ah
- Kobcinta wacyiga doorka difaaca ee bulshooyinku ciyaaraan sida bixinta taageerooyinka bulshada, dhaqanka iyo qoyska

HTO waxay sidoo kale u dagaalantaa istaraatiijiyadaha shaqaalaha ee dhisaaya adkaysiga dhaqaale. Taageerida ganacsiyada yaryar ayaa abuuraysa shaqooyin iyo hantida bulshooyinka aadka ugu baahan. Kordhinta helitaanka tababarada shaqada, barnaamijyada barashada xirfada iyo waxbarashada heer kuleej ayaa keenaysa hoos u dhigida cadaalad darada dhanka dakhliga ee bulshooyinka ay saamaynta ugu xun ku reebtay isir nacaybku.



HTO: Qorshaha Dhisida Oregon intaan Ka fiican

Healthier Together Oregon (HTO) waa farsamo awood badan oo lagu hormarinaayo sinaanta dhammaan dadka Oregon. Ayadoo COVID-19 uu wax badan kala cadeeyay, maaha in qof kasta helay fursad iskumid ah oo uu ku noolaado nolol caafimaad leh. Dadka aan cadaanka ahayn, dadka danyarta ah, dadka ktirsan bulshada LGBTQ+ (qaniisiinta), dadka soo galootiga ah iyo qaxootiyaasha, dadka naafada ah iyo dadka ku nool deegaannada miyiga ah ee gobalka ayaa waajahaaya caqabado badan sabab la xariirta cadaalad daro ka jirta qaab dhismeedka bulsho iyo midka dhisme taasoo saamayn ku leh caafimaadka.

Sababa la xariirta in caafimaadka iyo fayaqabku ku tiirsan yihiin arimo kaladuwan, HTO ayaa dejisay taxaneyaalka badan oo xeelado ah kuwaasoo, marka la xaliyo si guudna loo dhaqan gasho, hormarin muuqat ku samayn kara noloshu qof kasta oo gobalkaan dagan.

HTO waxay doonaysaa inay dejiso Qorsheyaasha Hormarinta Caafimaadka Bulshada iyo sidoo kale muhiimadaha wakaaladaha iyo ururada, barnaamijyada iyo maalgashiyada. Waxay doonaysaa iskaashato kaladuwan oo ka shaqeeya

laamaha kaladuwan oo wadaagaaya dedaal lagu dhaqan gelinaayo yoolalkaan waawayn. Waaxahaan waxaa kamid ah daryeelka caafimaadka, saraakiisha la doortay, loo shaqeeyaasha, tabarucaada, gaadiidka, isticmaalka dhulka iyo qorshaynta, caafimaadka gobalka, qabiilka iyo kan dadwaynaha ee maxaliga ah, cadaalada danbiyada iyo fulinta sharciga, ururada bulshada, ururada ku salaysan diinta, adeeg bixiyaasha guriyaynta iyo aadanaha iyo waxbarashada.



Nala samee Iskaashi

HTO waxay doonaysaa inay xariir la samayso qolyaha kale ee u taagan inay hormariyaan sinaanta ka jirta Oregon. Si aad u hesho xog dheeraad ah ama nagalaso xariir:



WEBSSETKA

healthiertogetheroregon.org



IIMEELKA

publichealth.policy@state.or.us



NOQO ISKAASHADE

healthiertogetheroregon.org/potential-partner



YOUTUBE

bit.ly/3jvkuAE



Healthier Together Oregon

healthiertogetheroregon.org

Waa mashruuc ay fulinayso
Oregon Health Authority
(Maamulka Caafimaadka ee Oregon)